


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Markii Ilaah Sameeyay
Waxkasta



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus

Waxa dhaqan-geliyay: Bob Davies; Tammy S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2013 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Yaa ina abuuray? Kitaabka Quduuska ah, Ereyga
Ilaah, wuxuu sheegayaa sidii uu kusoo bilaabmay
cirqiga aadanuhu. Wakhti fog hortiiis, Ilaah
wuxuu abuuray ninkii ugu horreeyay
waxaanu u bixiyay Aadan.



Ilaah wuxuu Aadan ka sameeyay ciidda dhulka.
Markii Ilaah uu Aadan ku afuufay nafta, Aadan wuu
noolaaday. Waxaanu is arkay isagoo dhex jooga
beer qurxoon oo la yidhaahdo Ceeden.



Ka hor intii Ilaah aanu abuurin Aadan, waxa uu sameeyay duni qurux badan oo ay ka buuxaan waxyaalo yaab badani.




Tallaaboba tallaabo kaddib, Ilaah wuxuu sameeyay
meelo taag ah iyo meel ban ah, ubaxyo udgoon iyo
dhir dhaadheer, shimbiraha baalasha leh iyo
shinni dananaysa, kalluunka badda ku jira iyo
xammaaratada. Xaqiiqadii, Ilaah wuxuu

abuurray waxkasta
oo waxkastaana
way jiraan.




Bilowgii, ka hor intii Ilaah aanu waxba abuurin, Ilaah oo keliya ayaa jiray. May jirin dad iyo meel iyo waxkale toona. Waxba may jirin. Muu jirin iftiin iyo mugdi toona. Meel hoose iyo meel sare toona may jirin. May jirin shalay iyo berry midkoodna. Waxa jiray oo keliya Ilaah oo aan lahayn bar bilow. Dabeetana Ilaah fal ayuu sameeyay.




Bilowgii Ilaah
samada iyo
dhulkuu abuuray.




Dhulkuna qaab ma lahayn,
wuuna madhnaa;
gudcurna moolkuu
dul joogay.
Dabadeed Ilaah
wuxuu yidhi.
"Iftiin ha
ahaado."



Iftiin baana ahaaday. Ilaahna iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, isla maalin ah.



Maalintii labaad, Ilaah wuxuu isu keenay biyay badaha waaweyn, badaha yaryar, iyo harooyinka iyagoo ka hooseeya Samada. Maalintii saddexaad, Ilaah wuxuu yidhi, "ciidda engegani ha muuqato," sidaasayna ahaatay.





Ilaah sidoo kale wuxuu amray inuu dhulku soo saaro
dhir waaweyn iyo kuwo yaryar iyo doog iyo
ubaxyo. Sidaasayna ahaatay.

Waxaana jira-fiid iyo
subax, maalintii
saddexaad.



Dabeeto Ilaah wuxuu sameeyay
cadceedda, iyo dayaxa, iyo xiddigo
badan oo aanay cidi tiring karin.
Oo waxaana jiray fiid iyo
subax, maalintii afraad.




Xayaawaanka badda
ku jira iyo kalluunka iyo
shimbiruhu waxay ahaayeen
kuwii xigay ee Ilaah
samaynayay. Maalintii
shanaad Ilaah wuxuu
sameeyay kalluunka
waaweyn iyo kuwa
yaryar, shimbiraha
lugaha dhaadheer
sida gorayada iyo
shimbiraha yaryar.




Ilaah wuxuu sameeyay
nooc kastoo kalluun
ah si ay u buuxiyaan
biyaha dhulka, waxa
kaluu sameeyay
shimbiraha nooc
kasta si ay uugu
raaxaystaan dhulka
iyo badda iyo cirkaba.



Intaas kaddib, Ilaah markale wuxuu yidhi, "Dhulku ha soo bixiyo uun nool oo caynkiisa dhala, ..." Nooc kasta oo xayawaan iyo cayayaan iyo xamaarato ah ayaa dabeetana samaysmay. Waxa jiray oo samaysmay maroodiyaal dhulka kaga gariirinaya iyo dabaggaalayaal. Daayeerro iyo yaxaasyo. Dirxiyada iyo cayayaanka kale. Geriga qoorta dheer iyo bisadaha yaryar ayaa iyaguna abuurmay. Nooc kasta oo xayawaan ahna waxa sameeyay Ilaah maalintaas.



Oo waxaa jiray fiid iyo subax
maalintii lixaad.



Ilaah maalintii lixaad
wuxuu sameeyay wax aad
cajiib u ah. Waxwaliba
hadda diyaar ayay u
ahaayeen ninka. Waxa
jiray cunto ku taalla dhirta
iyo xayawaan u adeegaya.



Ilaahna wuxuu yidhi, "Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna, oo iyagu ha xukumeen kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo xoolaha, iyo dhulka oo dhan, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan." Markaa Ilaah wuxuu dadka ka abuuray araggiisa, oo Ilaah araggiisa ayuu isaga ka abuuray.



Ilaah wuxuu Aadan ku yidhi. "Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa. laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo, xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa."



Oo Rabbiga Ilaah
ahu wuxuu yidhi, "Ma
wanaagsana in ninku
keligiis ahaado;
waxaan u samayn
doonaa mid caawisa
oo ku habboon."



Ilaahna dabeeto wuxuu Aadan u keenay haadda duusha iyo dugaagga oo dhan. Oo wuxuu iyagii u bixiyay magacyo. Oo magac bixintaasna waxa uu ku ahaa xariif. Laakiin dugaagga oo dhan iyo haadda oo dhan kamuu helin wax caawiya oo isaga ku habboon.



Ilaah wuxuu Aadan ku riday
hurdo dheer. Dabeetana
intuu isagii ka saaray feedh
ka mida feedhihiisa ayaa
waxa uu ka sameeyay
naag. Naagtan Ilaah uu
sameeyayna waxa ay
ahayd lammaanaha
ku habboon Aadan.



Ilaah wax kasta wuxuu ku sameeyay lix casho. Kaddibna Ilaah wuxuu barakadeeyay maalintii toddobaad oo u wuxuu ka dhigay maalin nasasho.



Beer Ceeden dhexdeeda, Aadan iyo
Xaawa oo naagtiisa ahaydi waxay ku
haysteen farxad dhammaystiran
iyagoo addeecaya Ilaah. Ilaah waxa
uu ahaa Rabbigooda, kan iyaga
waxkasta siiya iyo saaxiibkood.



Markii Ilaah Sameeyay Waxkasta

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 1-2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

